# U diyaar Garoow Qiimo Dhimisyo iyo Adeegyo Dheeraad ah

SEPT 5th 2021

**Laga bilaabo Sibteembar 5, 2021, Metro waxay soo kordhin doontaa basas cusub iyo tareenno waxayna samayn doontaa qiimo dhimista lacagaha baska lagu raaco si ay kuugu fududayso inaad ku laabato shaqada, dugsiga iyo meel kasta oo kale oo aad doonayso inaad aado.**

## Adeeg dheeraad ah maalinta oo dhan

- Metrorail ayaa furnaan doona saacad kadib xiligii caadiga ah (ilaa 1 habaynimo) maalmaha Jimcada iyo Sabtida iyo saacad kahor waqtigii hore (7 subaxnimo) maalmaha Axada.
- Waxaan ku shaqayn doonaa tareenno dheeraad ah maalin iyo habayn. Waqtiga sugitaanka tareenka ee caadiga ah ayaa noqon doona 2-7 daqiiqo.
- Waxaan basas dheeraad ah ku daraynaa wadooyinkeena ugu caansan si aad u hesho adeeg joogto ah inta u dhaxaysa 7 subaxnimo -9 fiidnimo, 7 maalmood Asbuucii.

## Safarada halka jiho ee $2 ah ee Metrorail

Ku raac Metrorail keliya #2 safar kasta oo hal jiho ah asbuuca oo dhan. Lacagta baska waxaa ku jira aadista/ka imaanshaha bilaashka ah ee Metrobus.

## Wareejinada baska ee bilaashka lagu tagaayo/looga imaanaayo tareenka

Raac baska bilaashka ah ee Metrobus markaad u gudbayso/ka imaanayso Metrorail. Hel qiimo dhimis $2 ah oo daboolaysa lacagtaada bas raaca ee gaadiidka Metrobus, marka laga reebo wadooyinka Degdega. Waa qasab inaad adeegsato kaarka SmarTrip® si aad u hesho qiimo dhimis.

## 20% oo Qiimo dhimis ah oo 7-Maalmood ah ayaa lagu bixinayaa Kaarka Baska Gobalka

Hadda waxaad heli karta Kaarka Baska Gobalka ee 7-Maalmood ah aadna ku helayso keliya $12 - iyo kaarka waayeelka/naafada oo ah keliya $6.

## Iibka Kaarka Baska ee Xagaaga!

50%

Kaydo cadad dhan ilaa 50% bishii, Kaararka 7, 3, ama 1 maalin ee aan xadidnayn inta u dhexaysa Sibteembar 16 iyo Oktoobar 15.

Xog badan ka fiiri **wmata.com/changes**. Wixii xog dheeraad ah oo ku qoran luuqadaada oo ku saabsan qarashka baska ee Sibteembar 2021 ee Metro iyo isbadellada adeegga, wac 202-637-1328.

M metro®